



## **Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WARSAXAAFADEED 04/2011**

#### **Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya oo beeniyay eedeynta loo soo jeediyay ciidamada booliska Soomaaliyeed ee tababarka u jooga Jabuuti**

Nayroobi, 24 Febraayo 2011 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilسان Soomaaliya, Danjire Augustine P. Mahiga, ayaa maanta beeniyay eedeynta uu Daahir Axmed Faarax, oo ka tirsan mucaaradka Jabuuti, u soo jeediyay ciidamada booliska Soomaaliyeed ee tababarka u joooga Jabuuti. Daahir wuxuu ciidanka booliska Soomaaliyeed ku eeddeeyay inay ku lug lahaayeen cabburin loo geystay dad reer Jabuuti ah oo dhowaan halkaa mudaaharaad ku sameeyay. Ciidanka booliska tababarka ku jira waxaa tababarka u fidiyay Qaramada Midoobay waxaana kharashka ka bixiyay Dowladda Japan. Qaar ka mid ah tababarayaasha ciidamadaasna waxay ka socdaan Ururka Midowda Africa.

“Jabuuti ayaa mirtigelisay tababarka ciidamadan. Dowladda Jabuutina waxay si joogta ah u muujisay inay taageerayso dadaallada ay waddo bulshada caalamka laguna horumarinayo nabadda iyo xasilloonida Soomaaliya iyo tan waddamada ku yaallaa gobolkaba.

“Intaas waxaa dheer in Dowladda Jabuuti ay muddo dheer ku hawlanayd taageerada dalka iyo dadka Soomaaliyeed ayna kaalin muhim ah ku leedahay geeddi socodka Soomaaliya tan iyo markii la billaabay. Dhowaanahanba Dowladdan Jabuuti waxay tababar u fidinaysay ciidamada booliska Soomaaliyeed,” ayuu yiri Danjire Mahiga.

Ambassador Mahiga wuxuu beeniyay eedeynta beenta ah ee uu soo jeediyay Daahir Axmed Faarax, isagoo eedeyntaas ku tilmaamay mid aan sal iyo raad lahayn. Wuxuu sheegay in ciidanka booliska Soomaaliyeed ee tababarka ku jira aan weli dhammeysan tababarkooda ka hor inta aysan u noqon magaalada Muqdishu bisha soo socota.

“Ciidanka booliska Soomaaliyeed ee tababarka ku jira waxay halkan u joogaan inay tababar qaataan oo keliya oo sinnaba uma farageliyaan arrimaha gudaha ee Jamhuuriyadda Jabuuti. Kani waa mawqifka rasmiga ah ee Qaramada Midoobay.”

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilسان isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)